Laanta sooshalka iyo caafimaadku waxay ogeysinaysaa
Social- och hälsovårdssektorn
Social Services and Health Care
Waxaa la cusboonaysiiyay 12.10.2020

228_Tietoa eristyspäätöksen saanelle_1
[somali]

Macluumaad loogu talagay qofka laga gaaray go'aanka gooni u haynta

Waxaa la xaqiijiyay in aad qabto cudurka fayruska Korona sababtaas darteed ayaana laguu geliyay gooni u haynta. Ujeedada gooni u hayntu waa ka hortagga in dadkakale ay fayruska Korona qaadaan. Go'aanka gooni u haynta waxaa lagu saleeyaya sharciga cudurada faafa.

Wakhtiga ay gooni u hayntu soconayso waxaa laguu sheegayaa marka lagu geliyo gooni u haynta. Gooni u haynta qof qaba calaamadaha cudurka oo qafiif ah waxay inta badan qaadataa marka ay calaamaduhu billowdaan 7 maalmood qofka cudurka fayruska Korona dartiis u baahan in isbitaal lagu daryeelanaya waxay qaadanaysaa 14 maalmood. Kahor inta aysan dhammaan gooni u hayntu waa in ay jiraan labo maalmood oo aadan laheyn wax calaamado ah. Haddii qaadistaada cudurka lagu caddeeyo saamiga lagaa qaaday wax calaamad ahna aadan lahayn, gooni u hayntu waxay qaadanaysaa 7 maalmood ka billaabanaysa maalminta saamiga lagaa qaaday.

Maxaa loola jeedaa goonni ku haynta?

Wakhtiga gooni u haynta waxaad ku qaadanaysaa gurigaada. Waa in aad iska ilaalisaa xiriirka taabashada ee dadka kale oo aad gurigaada ku ekaato. Ma aadi kartid tusaale ahaan goobta shaqada, dugsiga, xannaano-maalmneedka, hiwaadaha, dukaanka ama farmashiyaha, sababtoo ah goobahan marka la joogo waxaa adag in la iska ilaaliyo xiriirka taabashada. Marti kuuma imaan karto cuntadana waa in aad dalbataa.

Haddii aanay jirin qof cuntada ama daawada kuu soo qaadi karta, waxaad la xiriir kartaa telefoonka diyaargarowga adeegyada sooshalka ee lambarkiisu yahay 09 310 44400.

Si loo yareeyo khatarta qaadista cudurka, waa in aad xittaa gooni uga joogtaa dadka guriga kugula nool. Haddii ay suurragaltahay waxaa wanaagsan aad joogto qol ka gaar ah dadka kale. Nadaafadda wanaagsan ee gacmaha iyo quficidda waa muhiim.

Waa in aad iska ilaalisaa xiriirka dhow ee dadka marka ay tusaale qasab kugu tahay in aad eyga bannaanka u waddo ama aad qashin qaaddo.

Daryeelka cudurka

Guriga ayaad jirrada la joogi kartaa, haddii ay calaamadahaadu khafiif yihiin dadka cudurada u nugulna aadan ku jirin. Dhakhtarkaada xarunta caafimaadka ama dhakhtarkaada rugta caafimaadka shaqaalaha ayaa xaaladdaada qiimaynaa marka uu kugu soo wargelinayo natiijada baaritaanka Korona. Cabitaan kugu filan iyo nasasho ayaa muhiim ah inta aad jirrantahay. Xummadda iyo xanuunka waxaad isaga dejin kartaa daawooyinka farmashiyaha laga helo ee aan u baahnayn in dhakhtar qoro.

Haddii aad ka soo baxaan calaamado daran, sida neefta oo adkaata xaaladda guudna ay daciifto, wac rugtaada caafimaadka ama lambarka rugta talabixinta magaalada, tel. 09 310 10024 (wuxuu

228_Tietoa eristyspäätöksen saanelle_1
[somali]

furanyahay maalinkasta saacadda 8-18). Wakhtiyada kalana wac Caawimaadda heeganka, tel. 116 117. Haddii ay jirto xaalad u baahan daryeel degdeg ah, tusaale ahaan xabad xanuun degdeg ah, wac lambarka gurmadka degdegga ah 112.

Ogeysiiskan waxaad xittaa heleysaa marka uu cunuggaadu qaado cudurka fayruska Korona. Haddii aad cunuggaada ku aragto mid kamid ah calaamadahan soo socda, degdeg ugu qaad dhaktar daaweeya – adigoo aan u fiirinayna waxa cudurka keenay ama jirrooyinka caadiga ah.

- neefta qabatow
- jirka oo buluug xigeen ama qayirma
- cunuggu oo aan cabitaan ku filan qaadanayn
- cunuggu uu si joogto ah oo xooggan u hunqaacayo
- cunuggu oo aan uusan hurdada ka kaceyna ama uusan falcelinayn
- cunuggu oo aad u xanaaqsan yahay dhabta in lagu haya aan doonayn
- calaamaduhu ay ka baaba'aeen, laakiin way soo laabteen iyagoo wata xummad iyo qufac daran.

Magdhabidda mushaarka la waayay

Marka mushaarka lagu waayay sababo ka yimid gooni u haynta darteed waxaad xaq u leedahay in aad hesho lacag maalmeedka cudurada faafa. Waxaa laga codsaa Hay'adda hawlgalka qaranka (Kela). Go'aanka gooni u haynta ee uu qoray dhakhtarka magaalada Helsinki u qaabilsan cudurada faafa ayaad heleysaa si aad codsiga ugu lifaaqdo. Warqad qoran ahaan ama iimayl qarsan oo otomaatig ah ayaa laguugu soo dirayaa go'aanka gooni u haynta. Waa in codsiga geeysaa Kela-da labo bilood gudohood oo ka billaabanaysa marka gooni u haynta lagu geliyay.

Lacag maalmeedka cudurada faafa waxay si buuxda u magdhabaysaa mushaarka la waayay ee ay sababtay ka maqnaashaha shaqada, gooni u haynta ama karaantiilka. Lacag maalmeedka qofka shaqeeya waxay waafaqsantahay mushaarki uu qaadan lahaa, haddii uu qofku shaqeyn lahaa. Lacag maalmeedka ganacsaduhu waxay waafaqsantahay dakhli-sannadeedka YEL ama MYEL ee shaqaynaya marka ay ka maqnaashaha shaqadu billaabanayso. Waalidka cunugga kayar 16 sano wuxuu xaq u leeyahay in uu helo lacag maalmeedka cudurada faafa, haddii cunugga la geliyay karaantiil waalidkuna uu arrintaas darteed shaqayn waayay. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heleysaa cinwaanka www.kela.fi/tartuntatauti.

Dadka aad xiriirka dhow la leedahay waa lala xiriirayaa waxaana loo sheegayaa karaantiilka

Laanta sooshalka iyo caafimaadku waxay ogeysinaysaa
Social- och hälsovårdssektorn
Social Services and Health Care
Waxaa la cusboonaysiiyay 12.10.2020

228_Tietoa eristyspäätöksen saanelle_1
[somali]

Waxqabadka cudurada faafa ee magaalada Helsinki ayaa ka baaraandegaysa dadka aad xiriirka dhow la leedahay kaddibna u qorayso wakhtiyada karaantiilka. Wakhtiga karaantiilku soconato waa 10 maalmood oo ka billaabanaysa xiriir dhowaa ee ugu dambeeyay ee lala yeeshay qof uu cudurku ku dhacay. Haddii ay gurigaada deggan yihiin dad kale karaantiilku wuxuu soconayaa 2 todobaad oo ka billaabanaysa billowga calaamadaha cudurka ee qofki ugu horreeyay ee cudurka qaaday ama maalinta saamiga laga qaaday qofka aan calaamadaha lahayn.

Gooni u haynta waa in loo hoggaansamaa

Waa qasab in loo hoggaansamo gooni u haynta uu amray sarkaalka cudurada faafada. Sida uu qabo sharciga Finland, qofka jebiya amarka karaantiilka ama gooni u haynta waxaa lagu xukumi karaa ganaax ama ugu badnaan xabsi saddex bilood ah iyadoo loo cuskanayo jebiya ilaalinta caafimaadka, haddii xittaa uusan cudurka ku qabadsiin dad kale.

Toinen linja 4 A SB 6000 00099 MAGAALADA HELSINKI Telefoon 09 310 5015 www.hel.fi/sote
Andra linjen 4 A PB 6000, 00099 HELSINGFORS STAD Tel. 09 310 5015 www.hel.fi/sote/sv
Toinen linja 4A P.O. Box 6000. 00099 CITY OF HELSINKI Tel. 09 310 5015 www.hel.fi/sote/en